



San Diego Unified School District

EUGENE BRUCKER EDUCATION CENTER
4100 Normal Street, San Diego, CA 92103-2682

(619) 725-5506

Carl A. Cohn
Madaxa Waxbarashadda Dugsiyada

Sebtember 2007

Mudane Waalidiin ama Dadka ardeyda masuulka ka ah:

Ku soo dhawaada sannad-dugsiyeedka 2007-08. Qoysaska cusub iyo kuwii hore ee soo laabanayeyba waad ku mahadsan tihii inaad nagu sharaftaan inaan carruurtiinna u adeegno.

Sannad dugsiyeedka cusub ee dugsiyada waa wakhtiga ugu habboon inaan u heellanaano hirgelinta yoolalkeenna:

In la dedejiyo inay ardeydu waxbarashadda guul ka gaadhaan,
In ay dugsiyadu noqdaan kuwo badbaado, nabadgelyo iyo dayactirba leh,
In la xoojiyo xidhiidhka jaalnimo ee waalidiinta iyo jaaliyada lala leeyahay,
In niyada shaqaalaha kor loo qaado iyo
In miisaaniyad ku filan dugsiyada loo helo.

Waxaan ku faraxsanahay inaan idin la socodsiiyo horumarka aan ka gaadhney fulinta yoolalkeenii. Ardeyda dugsiyada San Diego waxay weli sii wadaan inay ka wanaagsanaadaan xaga waxbarashadda inta badan magaaloyinka waaweyn ee ku yaal dawlad-goboleedka California. Dariiqii saxda ahaa ayaan ku soconaa, laakiin waxaa loo baahan yahay inaan dadaalka sii kordhino, isla mar ahaantaasna, yareyno faraqa waxbarashadda ee ardeyda u dhexeeya. Si aan arrintaas u hirgelino, waxaa xilliga dayrtan la fulineyaa qorshe manhaj iyo wax dhigis cusub ah. Qorshuhu wuxuu ku jiheysan yahay inaan dhammaan ardeyda guul u rajeyno, wax dhigitaan ku salleysan heerar wax dhigitaan oo lagu tartameyo, tabo la rabo inuu ilmo *kasta* waxbarashadda ku guuleysto, si habboon u isticmaalida macluumaadka, iyo sii waditaan xirfadaha sare loogu qaadeyo aqoonta macallimiinta iyo maamuleyaasha.

Waxaa si wadi doonaa inaan dhageysano waalidiinta wax ay rabaan iyo waxa ay u baahan yihiin. Bishii Juunyo waxaa la qeybiyey sahan ama baadhitaan lagu sameynayo sida ay waalidiintu hawlaha waxbarashadda ugu qanacsan yihiin, kaas oo si bakhtiyaa-nasiib ah qoysaska degmada muunada ahaan loogu qeybiyey. Waalidiintii baadhitaankan soo buuxiyey ee wakhtiga u hurey wey mahadsan yihiin. Natiijooyinkii baadhitaankaas ka soo baxay ayaan weli darsaynaa, laakiin waxaan ku faraxsanahay in ka badan boqolkiiba sagaashan (90%) waalidiintaasu ay dugsigooda ku tilmaameen mid nabad iyo nabadgelyo aad ah leh, aadna loogu soo dhaweeyo oo la ixtiraamo dugsiyada.

Shan ka mid ah dugsiyada dawlad-goboleedka ugu casriyeysan ayaa markii koowaad irrida u furey ardeyda bisha Sebtember 4 teeda. Miisaaniyad dheelitirran ayaa leenahay, inkastoo dhibaatooyin miisaaniyadeed ay jiraan, iyo miisaaniyad si khalidan loo xisaabiyey oo ay sababtey dawlad-goboleedku. Beryo dhaweyd baadhitaan lagu sameeyey ku qanacsanaanta shaqalaha ee waxbarashadda degmada, shaqaalaha intooda badani waxay nagu wargeliyeen inay niyadooda iyo mooraalkoodu aad u wanaagsan yahay.

Guulahaas la gaadhey waxay ahaan kuwo ina dhiirrigelinya, hase ahaatee, hawlaheennii weli ma dhammeystirra. Taageeradaada iyo hawlgalkaaga, waxaan ka shaqeynaynaa sidii aan u noqon lahayn dugsiyada magaaloyinka dalka Maraykanka kan ugu wanaagsan.

Waad ku mahadsan tihii inaad noo oggolaataan inaan idiin adeegno. Sannad wanaagsan oo wacan!

Si daacdnimo ah,

Carl A. Cohn
Madaxa Waxbarashadda Dugsiyada
Somali version: 09. Sept07 PTA